

Waxaad ka Fileyso Dacwad-dhageysiga Maxkamadda Heshiisiinta

Tusamada Qoraalka

Hordhac.....	2
Markaad la xiriiyso Shaqaalaha iyo Garsoorka Maxkamadda	3
Xalraadinta	4
Diyaarinta Markhaatiyada	5
Diyaarinta Caddeymaha.....	6
Dibu-dhigista Dacwad-dhageysiga, haddii loo baahdo	7
Habdhaqanka maxkamada, oo ay ku jirto Dacwad-dhageysiga Fogaan-aragga.....	7
Maalinta Dacwad-dhageysiga	8
Dacwad-dhageysiga	8
Garhelid.....	9
Go'aanka	9
Racfaanka	10

Hordhac

Buugyarehan waxaa loogu talagalay dadka naftooda matalaya ee isu diyaarinaya dacwad-dhageysiga Maxkamadda Heshiisiinta, oo sidoo kale mararka qaarkood la yiraahdo Maxkamadda Dacwadaha Yaryar. Waxaa laguugu sharxayaa:

- Sida la isugu diyaargarobo oo looga qeyb qaato dacwad-dhageysiga;
- Siyaabaha loo heshiiyo; iyo
- Macluumaadka ku saabsan racfaanka.

Macluumaad ku saabsan sida loo xareeyo dacwadda Maxkamadda Heshiisiinta, [boogo barta Mowduuca Caawimaadda Maxkamadda Heshiisiinta](https://mncourts.gov/Help-Topics/Conciliation-Court.aspx) (mncourts.gov/Help-Topics/Conciliation-Court.aspx). Macluumaad ku saabsan sida loo dhaqan geliyo xukunka Maxkamadda Heshiisiinta, booqo barta [Mowduuca Caawimaadda Xukunka](https://mncourts.gov/Help-Topics/Judgments.aspx) (mncourts.gov/Help-Topics/Judgments.aspx).

Maxkamadda Heshiisiinta waa maxkamad gaar ah oo dadka loogu kala saaro kiisaskooda iyada oo aan loo mareyn habraac sharci ah oo adag. Caadi ahaan, qaansheegadka la keensado Maxkamadda Heshiisiinta waa \$15,000 ama ka yar. Haddii aad soo xareysaneyso qaansheegad ka badan \$15,000, waa inaad dacwad madani ah geysato Maxkamadda Degmada. Uma kala qeybin kartid qaansheegadkaaga qeybo yaryar si aad u gaarto heerarka xadeynta si aad dacwo u keensato Maxkamadda Heshiisiinta. Soo akhriso [Mowduuca Caawimaadda Dacwooyinka Madaniga](https://mncourts.gov/Help-Topics/Civil-Actions.aspx) (mncourts.gov/Help-Topics/Civil-Actions.aspx) si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan kiisaska madaniga ah ee Maxkamadda Degmada.

Dacwad-dhagaysiyada Maxkamadda Heshiisiinta xeerbeegti shaqo kuma laha. Laakiin beddelkeeda, Garsoore (Qaalli ama Xaakim) ayaa ridaya natiijada xukunka. Maxkamadda Heshiisiinta, markhaatiyaal iyo caddeymo ayaa la iska raba dacwad-dhageysiga. Kiiska la keensado Maxkamadda Heshiisiinta waa kuwa ka kharash yar oo ka fudud marka loo eego Maxkamadda Degmada.

Waxa kale oo kuu weheliya buugyarehan, waa wax aan kugu dhiirrigelineyno:

- Soo akhriso [Mowduuca Caawimaadda Maxkamadda Heshiisiinta](https://mncourts.gov/Help-Topics/Conciliation-Court.aspx) (mncourts.gov/Help-Topics/Conciliation-Court.aspx).
- Soo akhriso [Sharciyada Maxkamadda Heshiisiinta](https://revisor.mn.gov/index/GP/) (revisor.mn.gov/index/GP/).

- Soo daawo [fiidiyowga maxkamadeynta Maxkamadda Heshiisiinta](http://mncourts.gov/Help-Topics/Conciliation-Court.aspx) (mncourts.gov/Help-Topics/Conciliation-Court.aspx; on the Tools & Resources tab).
- La xiriir [Xarunta Adigu Nataadi Is-caawi](http://mncourts.gov/Help-Topics/Self-Help-Centers.aspx) (mncourts.gov/Help-Topics/Self-Help-Centers.aspx).
- [Talo ku saabsan kiiskaaga](http://mncourts.gov/Help-Topics/Find-a-Lawyer.aspx) (mncourts.gov/Help-Topics/Find-a-Lawyer.aspx) u raadso qareen.

Markaad la xiriireyso Shaqaalaha iyo Garsoorka Maxkamadda

Waxaa muhiim ah in aad sida ku habboon ula xiriirto shaqaalaha iyo garsoorka maxkamadda. Shaqaalaha maxkamadda waxay diyaar u yihiin in ay ku caawiyaan intii karaankooda ah. Waxa uu waajibkoodu yahay waa in ay ku siiyaan macluumaad, kuma siin karaan talo sharci ah. Macluumaad gaar ah oo ku saabsan waxa ay shaqaalaha maxkamadda sameyn karaan iyo waxa aysan sameyn karin, booqo barta [Caawimaadda Mowduuca Waxay Shaqaalaha Maxkamaddu Sameyn Karaan iyo Waxaysan Sameyn Karin](http://mncourts.gov/Help-Topics/What-Staff-Can-Do.aspx) (mncourts.gov/Help-Topics/What-Staff-Can-Do.aspx).

"*Gargoynta halka dhinac*" waa eray Laatiin ah oo macnihiisu yahay "hal dhinac oo keliya; ama loo go'aamiyey hal codsade". Gargoynta halka dhinac waa wax dhaca marka hal dhinac oo ah kiiska dacwada, ama qof ay is hayaan dad kale, markuu si toos ah ula soo hadlo ama dacwad ugu soo qorto garsoorka arrimo ku saabsan kiiska iyadoo aysan ogeyn dhinacyada kale ee ay is hayaan. Garsoorku ma tixgelin karaan sameynta gargoynta halka dhinac markay go'aaminayaan kiis dacwadeed ilaa ay sharci ahaan si cad oggolaansho ugu haystaan. Arrintaas waxay garsoorka ku caawineysaa in ay kiisaska u go'aamiyaan si caddaalad ah maadaama ay go'aamadooda ku saleynayaan keliya caddeynta iyo doodaha loogu soo bandhigo maxkamadda iyo sharciga lagu dabakhi karo. Xeerka ayaa xaqiijinayaa in uu habka maxkamadda yahay mid caddaalad ah iyo in ay dhammaan dhinacyadu haystaan macluumaad la mid ah sida kan garsoorka kiiska go'aamin doona.

Fadlan ixtiraam u muuji markaad la xiriireyso shaqaalaha iyo garsoorka maxkamadda.

Xalraadinta

Kiisas badan ayaa xal loo helaa dacwad-dhageysiga ka hor. "Xalka" waxa loola jeedaa in ay dhinacyada is haya heshiis wada galaan. Waxa laga yaabaa in xalka lagu wada gaaro marka ay si toos ah u wada hadlaan dhinacyada is haya ama habraac la yiraahdo "dhexdhexaadin." Dhexdhexaadiyuhu waa qof idiin dhaxeeya, oo la yiraahdi dhexdhexaadiye, oo adiga iyo dhinaca kale idinu caawinaya in aad ka heshiisaan khilaafaadka idiin dhaxeeya. Dhexdhexaadiyaha ma go'aamiyo kiiska, laakiin wuxuu kaa caawinayaa inaad la hadasho dhinaca kale oo aad isku daydo in aad heshiisaan. Soo akhriso [Mowduuca Caawimaadda Baddiilka Go'aangaarista Khilaafka \(ADR\)/Mowduuca Caawimaadda Heshiiska](https://mncourts.gov/Help-Topics/AlternativeDisputeResolution.aspx) (mncourts.gov/Help-Topics/AlternativeDisputeResolution.aspx) si aad u hesho faahfaahin.

Heshiisku wuxuu u oggolaanayaa in ay dhinacyada is haya gaaraan xal ku habboon baahidooda oo waxaa u suurtoobeysa inay dhinacyadu "sii ogaadaan" natiijada. Aadista maxkamadeynta macnaheedu waa inay Garsoorku soo go'aaminayaan natiijada kiiska intii ay dhinacyada is haya heshiin lahaayeen.

Haddii aad adiga iyo dhinaca kale heshiis wada gaartaan ka hor maalinta dacwad-dhageysiga, soo ogeysii maamulka maxkamadda ee degmada kiiskaaga si aad u ogaato tallaabooyinka xiga. Waa in aad hab qoraal ah ku soo xaqiijisaan in aad ku heshiiseen inaad xal wada gaarteen. Foomamka heshiinta waxaa laga heli karaa [Bogga Foomamka Maxkamadda Heshiisiinta/Dacwooyinka Yaryar](https://mncourts.gov/GetForms.aspx?c=10) (mncourts.gov/GetForms.aspx?c=10).

Haddii adiga iyo dhinaca kale aad rabtaan wakhti dheeraad ah oo aad uga wada shaqeysaan tafaasiisha heshiiska, waa in ay ogaadaan maamulka maxkamadda si kiiska dib la idiinku dhigo. Maxkamaddu waxay dib u dhigi kartaa dacwad-dhageysiga, ama waxaa loo baahan karaa adiga iyo dhinaca kale inaad ku timaadaan dacwad-dhageysiga hore adinkoo sharxaya heshiiska.

Akhriso [Mowduuca Caawimaadda Heshiiska Ka-baxsan Maxkamadda](https://mncourts.gov/Help-Topics/Settle-Out-of-Court.aspx) (mncourts.gov/Help-Topics/Settle-Out-of-Court.aspx) oo macluumaad dheeraad ah kuu ah.

Diyaarinta Markhaatiyada

Markhaatiyo ayaad keensan kartaa dacwad-dhageysiga Maxkamadda Heshiisiinta. Haddii aad keensaneyso markhaatiyaal, adiga ayaa masuul ka ah in aad hubiso in ay dacwada ka soo qeybgaaan. Kol hore qorsheyso. Garsoorku dib uma dhigayo dacwad-dhageysiga si aad u soo diyaarsato markhaatiyaal aad kol hore la xiriiri kartay. Waa in aad sida ugu dhakhso badan ula xiriirto markhaatiyaashaada taariikhda lagu qabto ballanta dacwad-dhageysiga.

Markhaatigu wuxuu noqon karaa adiga, qof kale oo goobjoog ahaa oo ogsoon sheegashadaada, ama "markhaati khabiir." Markhaatiga khabiirka waa qof leh aqoonta seyniska, farsamo, ama aqoon kale oo ku saabsan mowduuc gaar ah (tusaale, qandaraasle saqaf, dhakhtar caafimaad, injineer, farmashiiste, iwm.).

Haddii uu markhaati kaa yeelo in uu yimaado dacwadaada, uma baahnid amarka maxkamadda. Haddii uu markhaati kaa diido in uu yimaado dacwadaada, amar maxkamad ayaa loo diri karaa. U-yeerista maxkamadda waa amar maxkamadeed oo qof loogu sheegaya in uu yimaado maxkamadda iyo/ama keeno waraaqo. Haddii aad u baahan tahay in aad u yeerato markhaati, u soo codso sida ugu dhakhsaha badan.

Waxaad amarka maxkamadda ka codsan kartaa maamulka maxkamadda ee degmada kiiskaaga laga xareeyey. Si aad u sameysato codsiga, maxkamadda ayaad tegi kartaa ama qoraal ahaan ku soo codso. Lacag yar ayaa lagu bixiyaa amar kasta oo maxkamadeed. Maamulka maxkamadda ayaa diyaarin doona waraaqda u-yeerista. Marka xigta, waa in aad diyaarsato qof kale (oo aan ahayn adiga) oo gaaray ama ka weyn 18 sano inuu waraaqda u-yeerista u geeyo markhaatiga, oo waa inay la socoto kharashka markhaatiga. Waraaqda u-yeerista waa in loo gudbiyo taariikhda maxkamadeynta ka hor. Waa inaad markhaatiga siiso wakhti "macquul ah" si uu isugu diyaariyo dacwad-dhageysiga iyo/ama si uu u soo diro waraaqaha ku qoran waraaqda u-yeerista maxkamadda.

Sida lagu sharxay foomka u-yeerista, haddii aad u yeerato markhaati, waa in aad markhaatiga siiso \$20 maalintii, iyo lacagta maaylka socodka baabuurka, haddii lagaa rabo. Kharashka maaylka baabuurka sharciga ayaa dejiyey oo lagu qoray sharciga [Minn. Stat. § 357.22](#) (revisor.mn.gov/statutes/cite/357.22).

Lacagta markhaatiga iyo maaylka gaariga waxay khuseeyaan oo keliya markhaatiyada loo yeero. Si fudud haddii loo dhigo:

- UGU-YEERISTA MAXKAMADDA: WAA in aad bixiso lacagta iyo maaylka baabuurka markhaatiga.
- MARKAADAN CIDNA U-YEERAN: MA bixineysid lacagta iyo maaylka baabuurka markhaatiga.

Haddii aadan bixin karin khidmadaha waraaqaha u-yeerista, iyo khidmadaha markhaatiga, waxaad ka codsan kartaa maxkamadda ka-dhaafid (oo la yiraahdo "In Forma Pauperis"). Waxaad ka heli kartaa macluumaadka dheeraadka ee ka-dhaafidda khidmadda, sida foomamka la buuxinayo oo loo dirsanayo, barta [Mowduuca Caawimaadda Ka-dhaafista Lacagta](https://mncourts.gov/Help-Topics/Fee-Waiver-IFP.aspx) (mncourts.gov/Help-Topics/Fee-Waiver-IFP.aspx).

Mowduuca Caawinta Waraaqda U-yeerista iyo lacagta markhaatiga, soo akhriso [Mowduuca Caawinta U-yeerista](https://mncourts.gov/Help-Topics/Subpoenas.aspx) (mncourts.gov/Help-Topics/Subpoenas.aspx) iyo [Xeerka 45 ee Xeerarka Habraaca Madaniga ee Minnesota](https://revisor.mn.gov/court_rules/cp/id/45/) (revisor.mn.gov/court_rules/cp/id/45/).

Diyaarinta Caddeymaha

Dacwad-dhageysiga ka hor, habeyso caddeymaha taageeraya dacwadaada ama dhinacaaga. Caddeyntaada waxaa ka mid ah:

- Maragfurkaaga;
- Maragfurka markhaatiga;
- Xiriirkii idin dhaxeeyey adiga iyo qof kale sida farriimo ah boostada internetka, waraaqo, iwm.;
- Sawirro, heshiisyo qoran, qandaraasyo, ama waraaqo kale (tusaale, heshiiska kirada haddii kiisku ku lug leeyahay milkiile/kireyste);
- Biilasha la soo koobay, jeegag la tirtiray, caddeymo ama qaansheegyo, caddeyn ah lacagbixin, alaabo burbursan, iwm.;
- Caddeyn ah waraaq ama feyl shaashad oo kuugu jirta kambuyuutar ama taleefanka gacanta; iyo
- Caddeyn ah maqal/muuqaal (weydiiso maxkamadda caddeymaha qaabka lagaaga rabo).

Caddeymaha waa in la soo bandhigo inta lagu jiro dacwad-dhageysiga. Haddii aad imaaneyso dacwad-dhageysiga, waa inaad haysato waraaqaha asalka ah ama ugu yaraan 3 koobbi oo ah waraaq kasta. Hal koobbi waa kan Garsoorka, hal koobbi adigu hayso, hal koobbi waa kan dhinaca kale (oo waa in aad u diyariso koobbiyo badan haddii ay dacwada ku jiraan dhinacyo kale). Haddii dacwad-dhageysigaagu yahay fogaan-arag oo ay maxkamadda kaaga yimaadaan amar ama tilmaamo kale oo ku saabsan sida loo maareeyo bandhigyada, raac tilmaamahaas. Waxaad ka heli kartaa macluumaad kale oo ah dacwad-dhageysiga fogaan-aragga ah ee dhageysiga [Mowduuca Caawinta Dacwad-dhageysiga Fogaan-aragga](http://mncourts.gov/Remote-Hearings.aspx) (mncourts.gov/Remote-Hearings.aspx).

Dibu-dhigista Dacwad-dhageysiga, haddii loo baahdo

Haddii aadan ka soo qeybgeli karin ballantaada dacwad-dhageysiga, waxaad ka soo codsan kartaa maxkamadda in dib laguugu dhigo ama laguu qabto ballan kale. Waa in aad haysato sabab macquul ah haddii kale maxkamaddu codsiga ay kaa diidi kartaa. Haddii aad u baahan tahay inaad dib u dhigto dhageysiga, waa in aad qoraal ahaan kula xiriirto maamulka maxkamadda ugu yaraan 5 maalmood oo la shaqeeyo ka hor taariikhda dacwad-dhageysigaaga. Haddii ballanta dacwad-dhageysigaaga laguugu beddelo, maamulka maxkamadda ayaa adiga iyo dhinaca kale idiin soo diri doona ogeysiis ah taariikhda dacwad-dhageysiga cusub.

Habdhaqanka maxkamada, oo ay ku jirto Dacwad-dhageysiga Fogaan-aragga

Uma baahnid in aad dhar cusub u soo iibsato maxkamada, laakiin xusuusnow inay tahay meel rasmi ah oo Aad rabto inaad ilaaliso oo aad ixtiraamto labiska iyo dhaqanka. Carruur ha keenin maxkamadda. Haddii dacwad-dhageysigaagu yahay fogaan-arag, iska hubi in aysan jireyn wax ku carqaladeeya inta lagu jiro dacwad-dhageysigaaga. Waxaad ka heli kartaa macluumaad kale oo ah dacwad-dhageysiga ah [Mowduuca Caawinta Dacwad-dhageysiga Fogaan-aragga](http://mncourts.gov/Remote-Hearings.aspx) (mncourts.gov/Remote-Hearings.aspx).

Dabeecadaha habdhaqanka xun looma oggola maxkamadda gudaheeda, iyo xataa fogaan-aragga maxkamadda, sababta oo ah waa buuq, mashquulin, ama ixtiraam darro. Waa in aadan afka ku haysan xanjo, waxba cunin, seexan, dhegaysan qalab taleefan oo dhegaha la gashado, oo ha isticmaalin taleefanka gacanta, ha soo qaadan hub, ama ha isticmaalin

kaamarad, sida kaamaradaha taleefanka gacanta (haddii aan lagu oggolaan). Maxkamadaha qaarkood ma oggola in taleefan lala soo galo, xataa haddii ay dansan yihiin.

Maalinta Dacwad-dhageysiga

Ha ka daahin dacwawada ee iska hubso in ballanku yahay mid aad xaadireyso ama fogaan-arag. Haddaad toos u xaadireyso, ku talagal wakhtiga haddii ay dhacdo in ay jidadka baabuurta ciriir noqdaan ama in ay cimiladu xumaato, iyo baarkinka iyo baarista marka la gelayo maxkamadda. Haddii dacwad-dhagesigu yahay mid fogaan-arag ah, kol hore iska sii hubso siday u shaqeynayaan qalabka aad isticmaaleyso iyo in aad haysato wakhti badan si aad u gasho.

Haddii aadan dhex joogin maxkamadda (inaad toos u soo xaadirto ama fogaan-arag ahaan) marka loo yeero kiiskaaga, sidaas ayaa "laga guuleysan karaa" (in aad soo xaadiri weydey). Haddii ay kugu dhacdo xaalad degdeg ah ama aad daahdo, taleefan u dir maxkamadda, oo u sheeg. Xataa adiga oo taleefan soo diray, ayey maxkamaddu qaban kartaa dacwad-dhageysiga adiga oo aan joogin, oo sidaas ayaa si khalad ah lagaaga guuleysan karaa.

Haddii aad imaaneyso dacwad-dhageysigaaga, waa in aad hesho qolka maxkamadda, ka dibna eeg jadwalka maalinlaha ah ee maxkamadda oo inta badan lagu dhejiyo qolka maxkamadda bannaankiisa. Jadwalka ka dhex raadso magacaaga ama kiiskaaga. Haddii uusan kiiskaagu liiska ku jirin ama aan jadwal la soo dhejin, caawimaad weydiiso karraaniga qolka maxkamada. Waxaa laga yaabaa inaad u baahato in aad ka hubiso karraaniga maxkamadda ee qolka maxkamadda xataa haddii uu kiiskaaga ama magacaagu ku qoran yahay jadwalka taariikhda.

Dacwad-dhageysiga

Dacwoodaha, dacweysanaha, iyo markhaati kasta oo kale oo maragfur sameyn doona waxa ay ku dhaaran doonaan in ay runta sheegayaan. Dacwoodaha (qofka dacwada keensada) ayaa marka hore bilaabli doona dacwad-dhageysiga. Ka dib maragfurka dacwoodaha, marka ay dhinac kasta sheegaan gartooda, Garsoorka iyo eedaysanaha ayaa laga yaabaa in ay su'aalo ka keenaan kiiska. Haddii dacwooduhu haysto markhaatiyaal, marka xigta ayey maragfuri doonaan. Garsoorka iyo eedaysanaha ayaa sidoo kale su'aalo ku weydiin kara. Ka dib marka uu dacwooduhu soo bandhigo caddeymaha, waxay noqon doontaa eedeysanaha markiisa si uu u

sharxo garta dhinacooda. Eedayanuhu waxa uu soo bandhigi karaa caddeyntiisa, oo markhaatiyadiisa waxay ku marag furi karaan magacooda. Dacwoodaha iyo Garsoorka ayaa su'aalo weydiin kara dacweysanaha iyo markhaatiyaashiisa. Dacwoodaha ayaa looga fadhiyaa caddeynta dacwada uu wato, oo dacweysanuhuna waa in uu caddeeyo dacwo lidka ku ah, haddii ay jirto. Sidaas waxaa la yiraahdaa in la iska rabo culeyska caddeynta.

Inta uu dacwad-dhageysigu socdo, si taxadar leh u dhegeyso garsoorka iyo dhinacyada kale. Fasax weydiiso Garsoorka markaad rabto in aad hadasho. Waa in aad si toos ah ula hadasho Garsoorka, oo waa in aadan toos ula hadlin dhinaca kale. Markaad la hadleyso Garsoorka, ku billow inaad tiraahdo, "Garsooraha Sharafta leh." U hadal si cad oo lagu maqlo. Marna ha la doodin ama ha carqaladeyn qof kale ee isku day in aad xakameyso shucuurtaada. Isku day in aad sheekada dhinacaaga ugu sheegto si deggan, cad, oo kooban. Haddii aad khilaafsan tahay wax ay sheegtaan dhinaca kale, weydiiso Garsoorka haddii aad ka jawaabi karto.

Garhelid

Haddii uu dacwoodaha, qofka dacwadda keensaday, imaan waayo markay bilaabato dacwad-dhageysiga, waxa ay u badan tahay in ay garsoorku sidaas ku joojinayaan kiiska. Laakiin haddii uu dacweysanaha, qofka dacwadda lagu soo oogay, soo xareystay dacwad lid ah oo uu qofkaasi soo xaadiray dacwad-dhageysiga, maxkamaddu waxay soo saari kartaa xukun kama-dambeys ah oo ka dhan ah dacwoodaha.

Haddii dacweysanuhu imaan waayo dacwad-dhageysiga, balse uu yimaado dacwoodaha, garsoorku waxa ay garta siin karaan qofkii ay is hayeen dacweysanaha.

Haddii aysan dacwoodaha iyo dacweysanaha midkoodna imaan dacwad-dhageysiga, kiiska waa la joojin doonaa. Kiiska sidaas ayaa lagu joojin karaa oo qofna looma eexan. Haddii kiiska sidaas lagu joojiyo oo aan qofna loo eedayn, macnaheedu waa in dacwada mar kale la soo xereysan karo. Haddii kiiska sidaas lagu joojiyo oo aan qofna loo eedayn, macnaheedu waa in aan dacwada mar kale la soo xereysan karin.

Go'aanka

Haddii ay dhinacyadu wada yimaadaan dacwad-dhageysiga, Garsoorka ayaa dhageysan doona maragfurka iyo caddeymaha la soo bandhigay. Waxaa la soo go'aamin donaa

natiijada kiiska. Kiiska Maxkamadda Heshiisiinta yaalla, Garsoorka ayaa laga yaabaa inuu "ka xukumo kursigiisa," taas oo macnaheedu yahay in kiiska la go'aamin doono dhammaadka dacwad-dhageysiga. Haddii aan kiiska lagu xukmin isla kursiga, waxaa la soo diri doonaa go'aan qoraal ah, oo waxaa la yiraahdaa amarka, dacwad-dhageysiga ka dib.

Haddii aad ku guuleysato kiiska oo lagu xukmiyo lacag ka dhan ah dhinaca kale, xukunku ma dhaqangeli doono ilaa 20 maalmood ka dib marka amarka loo diro dhinaca kale. Habkaas waxaa la yiraadaa "haynta" xukunka oo dhinacyada ayaa haysta wakhtiga racfaanka.

Racfaanka

Haddii aad soo martay dacwad-dhageysigaaga laakiin aadan ku qancin go'aanka Garsoorka, waxaa laga yaabaa in aad racfaan ka qaadato Maxkamadda Degmada. Taas macnaheedu waa in aad kiiska u wareejiisaneyso maxkamad kore oo aad soo bilaabeyso. Maxkamadda degmada marka la joogo, waxaad codsan kartaa in kiiska uu go'aan ka gaaro garsoorkooda ama xeerbeegti (waxaa jira kharash dheeraad ah haddii aad rabto in ay kiiska kuu go'aamiyaan xeerbeegtida).

Racfaanku waa wax aad u dhib badan. Waxaa lagugu dhiirigelinayaa inaad hesho talo sharci oo ku saabsan racfaanka ama aad tixgeliso inaad qareen qaadato. Waxaad heleysaa macluumaad ah talo sharciyeed oo bilaash ah iyo sidoo kale ilo aad ku heleyso qareen [Raadso Mowduuca Caawinta Qareenka](#) barta Waaxda Garsoorka ee MN (mncourts.gov/Help-Topics/Find-a-Lawyer.aspx).

Haddii aadan imaan dacwad-dhageysiga, oo uu Garsoorku dacwada u xukumo dhinaca kale maqnaanshahaaga awgeed, mar kale ayaad furan kartaa kiiskaaga iyo dacwad-dhageysi kale haddii aad haysato sabab macquul ah oo aad uga maqneyd dacwad-dhageysiga. Si aad u codsato in kiiska dib loo furo oo lagu qabto dacwad-dhageysi kale, waa in aad soo buuxiso oo aad soo xareysato Codsiga Ka-noqoshada (Joojinta) Amarka Xukunka oo Lagu Qabto Maxkamadeyn Cusub. Waa in lagu soo xareeyaa 20ka maalmood ee ah sugitaanka, oo waa in aad muujiso:

- In aan lagu siin ogeysiiska saxa ah ee dacwad-dhageysiga;
- In uu kaa khaldamay wakhtiga dacwad-dhageysiga; ama
- In aad dacwad-dhageysiga uga maqneyd sabab kale oo sax ah.

In laga yaabo in maxkamaddu kaa yeesho codsigaaga ah dacwad-dhegaysi kale, ama waa laguu diidi karaa. Haddii ay maxkamaddu kaa yeesho codsigaaga, waxay laguu ballan qaadayaa dacwad-dhageysi kale. Waxaad u baahan doontaa in aad u timaaddo dacwad-dhageysiga (maxkamadeynta).

Haddii ay maxkamaddu diiddo codsigaaga, waxaad soo gudbin kartaa Dalab Xadidan oo ah Ka-noqoshada Maxkamadda Degmada. Taas waa ka-noqosho xaddidan, taas oo macnaheedu yahay in Garsoorka Maxkamadda Degmada oo keliya go'aamin doono haddii xukunka aan caadiga ahayn la joojiyo oo la qabto dacwad-dhageysi cusub. Haddii ka saaristaada xaddidan la oggolaado, waxaad dib ugu laaban doontaa dacwad-dhageysi ah Maxkamadda Dhexdhexaadinta.

Waxaad macluumaadka dheeraadka ah ee racfaanka [Maxkamadda Dhexdhexaadinta](https://mncourts.gov/Help-Topics/Conciliation-Court.aspx) (mncourts.gov/Help-Topics/Conciliation-Court.aspx) iyo [Mowduuca Caawinta Racfaankas](https://mncourts.gov/Help-Topics/Appeals.aspx) (mncourts.gov/Help-Topics/Appeals.aspx).